



Helitaanka Caawimaada Daynta Guriga inta lagu Jiro Aafada COVID-19

Hakinta guri ka saarida kahor intaan ganacsiyada la xirin ee soo baxday Maarso 18, 2020 kaliya waxay qabanaysaa noocyo gaar ah oo daymaha guryaha ah:

- **FHA**
- Si aad u ogaato inaad haysato iyo inkale daynta guriga ee caymiska siiso FHA, wac (800) 569-4287.
- **Fannie Mae**
- Si aad u ogaato inaad haysato daynta guriga ee caymiska Fannie Mae, ka fiiri barta oonleenka oo ah <https://www.knowyouroptions.com/loanlookup>
- **Freddie Mac**
- Si aad u ogaato inaad haysato daynta guriga ee ay caymiska Freddie Mac, ka fiiri barta oonleenka oo ah <https://www3.freddiemac.com/loanlookup/>



Muxuu xeerka hakinta guri ka saaridu qabanayaa?

- Daymaha guryaha ee caymiska ka hela FHA, Fannie Mae iyo Freddie Mac,

Dayn bixiyaha (shirkada aad siiso dayntaada guriga) ma codsan karto la wareegida guriga ilaa laga gaaro kadib Maayo 26, 2020.

Dayn bixiyaha (shirkada aad siiso dayntaada guriga) ma fulin karto la wareegida guriga dacwadiisu maxkamada taalo ilaa laga gaaro kadib Maayo 26, 2020.



Maxaan sameeyn karaa haddii aanan ku jirin amarka hakinta guri ka saarida?

- Waa inaad la xariirta shirkada daynta kugu leh isla markaba haddii aad ku jirto dhibaato dhaqaale aadna u baahan tahay in lagaa caawiyo dhiibista daynta guriga.
- Waxaad u qalmi kartaa inaad codsato dib u dhigista bixinta daynta, wax ka badalida daynta ama noocyada kale ee caawimaada daynta guriga

Haayada Legal Aid Society ee Columbus iyo Adeegyada Sharciga ee Koonfur-Bari Ohio (Southeastern Ohio Legal Services) ayaa siiyo caawimaad sharci oo bilaash ah dadka danyarta ah ee reer Ohio iyo dadka waayeelka ah. Wac si aad isku qorto 614.241.2001 (bartamaha Ohio), 1-740- 383-2161 ama 1-888-301-2411 (Degmooyinka Delaware, Marion, Morrow iyo Union) ama 1.833.288.2936 (Koonfur-Bari Ohio).

Legal Aid qofna uma takoorayso sababo la xariira isir, midab, wadanka uu kasoo jeedo, naafada, ama da'da marka la qoraayo, la daawaynaayo, ama uu ka qaybgalaayo barnaamijyadeeda, adeegyadeeda iyo shaqooyinkeeda, ama shaqada.

